


Tilmaamaha Qiimeynta Early Achievers

Early Achievers waxay adeegsadaan habka darajeynta si ay gacan uga siiyaan qoysasku inay fahmaan bixiyaha daryeelka carruurtooda heerkiisa horumarka tayada.

Nidaamka darajeyntu wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan tayada barnaamijyada waxbarashada hore si aad ugu kalsoonaato doorashada daryeelka ilmahaaga.



Xirfadlayaasha waxbarashada hore waxay si joogto ah u sii dhisayaan xirfadahooda horumarinta iyada oo loo marayo Early Achievers. Ka qaybgalkooda wuxuu muujinayaa ballanqaadka hagaajinta tayada

Heerka 1: Xarumaha Shatiga leh


Si aad ugu soo qaybgasho Early Achievers, bixiyeyaasha waxbarashada hore waa inay soo buuxiyaan shuruudaha shatiga si loo xaqiijiyo jawiga amaanka iyo caafimaadka carruurta. Shaqaalaha shatiga leh waxaa loo tababaray horumarka ilmaha, gargaarka degdegga ah iyo CPR oo waa inay ka gudbeen baaritaanka asalka ee qofka oo dhammaystiran.

Heerka 2: Koritaanka Xirfadda iyo Maamulka Xarunta

Xarumaha Heerka 2 waxay ka qaybgalayaan horumarinta tayada. Bixiyayaashan waxay ka shaqeynayaan inay gaadhaan Heerarka Tayada Early Achievers iyo shuruudaha barnaamijka iyada oo loo marayo tababar, is-qiiimayn, iyo dokumeentiga.

Heerka 3—5: Qiimeynta iyo Darajeynta

Goobaha la qiimeeyay ayaa gaarey heer tayo oo xad sare ah. Goobahaasi waxay ku muujiyeen tayada iyada oo loo marayo qiimaynta goobta oo diiradda saartaysa jawiga waxbarashada iyo isdhexgalka u dhexeeya macalimiinta iyo carruurta.



WASHINGTON
EARLY ACHIEVERS
PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL